



**KEEP
EALING
SAFE**

NHS

Test and Trace



Ealing

www.ealing.gov.uk

MAU JEEDAA SAFAR AASAASI AH? QAADO BAADHITAAN BILAASH AH

Waad ku mahadsantahay wax walbo aad sameeneysay si aad Ealing uga dhigto meel badqaba sannadkii lasoo dhaafey. Kahor intan ka bixin bandowga, waa inaan yaraynaa heerarka COVID-19 ee degmadeena. Waxaan dooneynaa inaan badqabkaaga ilaaalino. Fadlan sii wad raacitaanka shuruucda bandowga, guriga joog, xadid xiliyada aad dibada aadeysid oona ka fogoow xiriir la yeelashada dadka kale intii macquul ah.

Tiro yar oo dad ah oo degmadeena jooga ayaa laga heley nooca Koonfurta Africa. Majirto caddeyn ah in dadka xanuun ka daran kan caadiga ah ku sababaayo ama eysan tallaalku dawayn.

Bisha soo socota, dadka dhamaan ka wayn 16 oo kasoo taga gurigooda sababo la oggolyahay owgeed waxay heli doonaan baadhitaan COVID-19 bilaash ah, xitaa haddii eysan lahayn calaamado. Dadka caafimaad ahaan aadka unugul misena isdifaacaya ma ahan iney baadhitaan guriga uga soo tagaan.

Waxaan samaynay xarumo baadhitaano dhamaan degmada (arag) waxaana sidookale yeelan doonaa unug baadhitaan oo ku wareega banaanka iyo agagaarkuba.

Waxaan oganahay in dadka faracoodu yahay Madow iyo Asiyan aad u waxyeeloobeen, oona leh xanuuno daran iyo dhimasho badan. Sidaa darted waxaan isha ku haynaa inaan kordhino baadhitaanada bulshooyinkan dhexdooda.

Haddii lagu siiyo tallaalka, fadlan xaqiiji inaad qaadato.

ISKAGA QAAD BAADHITAAN MID KAMID AH GOOBAHAN BAADHITAAN

SIDA LOO HELO BAADHITAAN
 Waxaa jira labo nooc oo goobta baadhitaanka ah – mid loogu talagalay dadka leh calaamadaha iyo mid loogu talagalay dadka aanay wax calaamad ah ka muuqan.

Ma leedahay calaamadaha COVID?
 Baadhitaan ka ballaaso xarun baadhitaan oo deeganka ah oo naftaada ka karamiili daadka guriga kula jooga.

-  Featherstone Terrace Car Park
Southall UB2 5AL
-  Michael Flanders Centre
Acton W3 8PP
-  Gurnell Leisure Centre Car Park
Ealing W13 0AL
-  Dormers Wells Leisure Centre Car Park
Southall UB1 3JB
-  Northolt Leisure Centre Car Park
Northolt UB5 4AB


 **119**  www.nhs.uk/coronavirus

Haddii aadan LAHAYN calaamado

Qaado baadhitaan nooca adigoo socda ah ee bilaashka ah, uma baahnid ballan

-  Everyone Active Acton Centre
Acton W3 6NE
-  Ealing Central Library
Ealing W5 5JY
-  Perceval House
Ealing W5 2HL
-  Greenford Library
Greenford UB6 9LG
-  Northolt Library
Northolt UB5 5AS
-  Southall Manor House
Southall UB2 4BJ

 www.ealing.gov.uk/CovidTest



 Taariikhaha iyo wakhtiyadu way kala duwanyihiin

  Taariikhaha iyo wakhtiyadu way kala duwanyihiin

 Degaalka ka baar goobaha baadhitaanka wareega iyo midka meel badan laga helo.

SIDA LA ISKU ILAALIYO

Waad ku mahadsantahay qof walbo raacitaanka shuruucda bandowga iyo ilaalinta badqabka Ealing.

Haddii eytahay inaan ka baxno oona dibada ka joogno bandowga, waa inaan sii wadnaa raacitaanka shuruucda bandhowga oona joognaa guriga sida ugu macquulsan.

Ka tagitaanka guriga

Iskuday oo xadid inta jeer aad ka baxaysid guriga. Kaliya usamee sababo aasaasi ah. Masaafadaada ka ilaali dadka kale, xiro waji dabool oona dhaq gacmahaada si joogto ah.

Xusuusnow

Guriga kuma xayiranid. Guriga waad ku badqabtaa.

Mau jeedaa safar aasaasi ah?

Dadka ka wayn 16 oo dibada u baxaya waa iney qaataan baadhitaan COVID-19 oo bilaash ah, xitaa haddii eysan lahayn calaamadaha.



GACMAHA



WAJIGA



MASAAFADA



**KEEP
EALING
SAFE**

NHS

Test and Trace



Ealing

www.ealing.gov.uk

CAAWIN IYO KAALMO

LACAGA-BIXINTA IS-GO'DOOMINTA SHAQSIYEED

Kaalmo lacag-bixineed oo ah £500 ayaa diyaar u ah si loo caawiyo dadka is-go'doomiya oo dhaqaalahoodu hooseeyo, iyo si loo dhiirogaliyo in dad badan is baadhaan.



Haddii ey NHS kuu sheegtey inaad is-go'doomiso, sababtu eytahay ama inaad baadhitaanka coronnvirus (COVID-19) boositif noqotay ama aad xiriir la yeelatay qof boositif kusoo baxday, oo aad shuruudahana kasoo baxdo, waxaa lagu qoondeyn karaa £500 si lagaaga caawiyo inaad maareysid xiliga is-go'doominta shakhsiyeed.



www.ealing.gov.uk/selfisolationpayments

WADAJIRKA EALING

Haddii aad caawimaad ugu ubaahantahay shaqooyinka maalinlaha ah xiliga aad is-go'doomineysid, sida soo dukaamaysida ama soo qaadashada dawooyin, la xirii Wadajirka Ealing.



Kawac teleefonka gargaarka
Wadajirka Ealing 020 8825 7170

